

**WARSAXAAFADEED****Baydhabo 15, December 2016**

Golaha Odayasha Dhaqanka Koonfur Galbeed, Waxey si cad u qaadaceen go'aanka kasoo yeeray Gudiga Xalinta khilafadka Doorashoyinka. Golaha Odaysha Dhaqanka Koonfur Galbeed waxey uga digayaan dhammaan hay'adaha iyo wadamada shisheeye ee kuhowan arrimaha hormarinta dowladnimo iyo habsami usocodka Dorashoyinka dadban in GXKH ay ku kaceen fal eexad ah iyo musuqmaasuq cad oo aan geedna loogu soo gaban isticmalayna hab siyaasadeysan, ilsa markaana u adeegaya dad dano qas ah wata damacsana in ay wadanka ay geliyaan qalalaaso siyaasadeed.

Golaha Odayasha dhaqanka waxey go'aan cad ku gaaren:

1. In marnaba aanan la ogalaan go'aanka kasoo yeray GXKH ayada oo ay jirto musharaxiin kuso hungobay dorashoyinka kadhacay deeganadoda kalsoonina ka waayay shacbaka ay sheganayaan in ay mataalaan isla markaana ay garab ka helayaan shaqsiyaad siyaasiyiin ah oo dano gaar ah ka leh musharaxiinta waayay kalsoonida shacabkooda.
2. In marnaba Gudiga Dorashooyinka dadban ee Konfur galbed aysan qaadan go'aanka siyaasadeysan ee ka soo yeeray GXKH.
3. In Madaxweynaha Koonfur galbeed uu ka hortago shaqsiyaadka damacsan in ay wadanka geliyaan carqalad siyaasadeed si cadna uga hortago go'aankan guracan oo ay gaareen GXKH.
4. In si buuxda loo taagero go'aanka Gudiga Doorashooyinka ee Koonfurgalbeed ay ku qaadaceen go'aanka GXKH.
5. In ayaandaro loo arko iyo musuqmaasuq weyn in lasoo celiyo kuraas ay dadkooda si xur ah ugu codeeyaan, doorteenaa xildhibaanka ayaga ku meteli lahaa Golaha Shacabka.

Golaha Odayasha dhaqanka KG waxey sicad u qaadacayaan soo celinta kuraasta 5ta ah taaso loo arko qalad cad. Doorashoyinkaa waxa ay kud haceen si cadalad ah goobjoogayaalna ay ka ahaayeen dhammaan hay'adaha ay quseyso sida Unsom, Amisom, Gudiga Dorashoyinka Dadban ee Dowlada Fedaralka, iyo Dhaman hay'adaha madaxa banana.

Beesha caalamka iyo Madasha Qaranka waxaan ugu baaqeynaa in ay ka foojignaadaan go'aankaas guracan ay gaareen GXKH.

DHAMMAAD